# Su'aalaha Inta badan la Is waydiiyo:

- ***Waxaan ku leeyahay meesha dheriga la saaro ama wax lagu moofeeyo meelo kala duwan.*** Shoolada badbaada waxaa muhiim ahaan loogu talo galay meelo dheryaha la saaro. Dabka ka kaca meesha dheriga la saaro waxa dhici karta inuu kiciyo dab bacan. Caadi ahaan, dabka moofada khatar maaha, xataa haddii biisada gubatay ee ku jirta moofada ay sii dayn karto qiiq sun ah.

- ***Shoolada badbaadadu iskeed ayay isku demisaa.*** Hubi haddii shooladaada badbaadadu ay tahay moodeel cusub. Shooladaha udambeeya ee badbaadada waxay ka wanaagsan yihiin oo badbaadu ahaan ka badan yihiin, oo waxya ka hortagaan inay tani dhacdo. Sidoo kale muhiim ayay kuu tahay adiga inaad laftaadu la qabsato oo raacdo tilmaamaha wixii ah shoolada badbaadada ah.

- ***Miyaan u baahahay shoolada badbaadada ah haddii aan haysto halka dheriga la saaro ee dabku kordhayo?*** Shuruudaha shoolada badbaadada ah way habbon tahay macno ma leh nooca uu yahay meesha dheriga la saaro. Waxay ku habboon tahay halka dheriga la saaro oo dhoobo ah, bir ama meel kale oo dabka Shoolada dabku waxay sii wadi doontaa inay kulayliso maqlaha suugada ilaa ina ay saaran tahay shoolada. Cunto kariyayaashan sidoo kale dabka ayaa qabsan kara.

- ***Waxaan hayaa shoolada gaasta ku shaqaysa. Weli ma u baahanay shoolada badbaadada ah?*** Maya, laakiin kariyaha gaastu waxay maalmahan dambe u baahan tahay ka ilaalinta ololka. Intaa waxa dheer, shooladaha koronta ah waa kuwa dab ahaan ugu khatarta badan.

La soo saaray Diisambar 2019

ALT VI KAN MOT BRANN

*Dhammaan dedaalada ku lidka ah dabka* waa qorshaha ka hortaga dabka ee qaranka, ay ka warhayaan farsama Wada Xidhiidhka Bdbaada Dabka ee qaranka 2013-2020. Kooxda isku xidhka qaranka waxay ka dambaysaa qorshaha, oo waxay ka kooban tahay masuuliyiinta, shirkadaha caymiska iyo ururada kale ee ku jira badbaadada dabka iyo korontada Noorway.

dsb Direktoratet for samfunnssikkerhet og beredskap • Norsk brannvernforening • nelfo • Finans Norge • Norsk brannbefals landsforbund • Feiermesternes landsforening

DIIWAANGELIN SHIRKADDAHA KARTIDA LEH • MASUULIYIINTA BAADHITAANKA MAXALIGA AH EE BADBAADADA KORONTADA • MADASHA MACLUUMAADKA DABKA




ALT VI KAN
MOT BRANN

# Shoolada badbaadadu waxay badbaadisaa nolosha.

Ka hel macluumaad dheeraad ah bogga sikkerhverdag.no/en

# Shooladaha badbaadadu nolosha ay badbaadiyaan!

In ka badan kala badh dabka ka kaca guryaha Noorway waxaa sababa dheri la baylo ama dabka shooladaha. Qof kasta way ku dhici kartaa. Dadka da'da yar ee cuntadda karinayaa habeenkii, waalidka iyo carruurta dhalinta yar waxay dhib ka soo gaadhaa marka wax la karinayo iyo waayeelka iloobay cuntada ugu karaysa shoolada/



## Waa maxay shoolada badbaadada ah?

**1. Sideey u shaqaysaa?**

Shoolada badbaadada waxay samaysaa cod digniin ah oo si otomaatiga ayay korontada isaga jartaa haddii aad ilowdo inaad demiso halka dheriga la saaro ama ay aad u kululaato.

Shoolada badbaadada waxay ka kooban tahay labba qaybood, dareeme ku yaala xaga sare ee shoolada iyo batanka laga dembiyo oo laga daaro korontada, kaas oo miduun ku yaala xaga dambe ee shoolada ama gudaha bogoska fiyuuska. Haddii dareemayaasho ay ka warhayaan xaga sare ee dheriga la saaro. Haddii dareemayaashu ay ogadaan khatarta dabka, waxay bixisaa digniin. Haddii aanu qofna tan ka jawaabin, dareemahu wuu ka demin doonaa shoolada korontada.

Shooladaha badbaadada waxaa lagu rakibi karaa dhammaan cunta kariyayaasha korontada ku shaqeeya.

**2. Rehaabka ku lidka ah meel la sameeyay?**

Waxaa jira labba nooc oo shoolada badbaadada ah:

1. Shoolada badbaadada ah ee ku xidhan waayir ilaa godka korontada (loo yaqaano rehab) Noocan fudud ee shooladada badbaadada waxaa rakibi kar qof kasta. Xaga sare ka eeg tilmaamaha.

2. Shoolada badbaadada leh ee ku xidhan nidaamka korontada ee u baahan in lagu xidho bogoska fuyuuska. Kuwan waa inuu rakibaa farsamayaqaanka korontada rakibaa. Marka dib loo samaynayo kijada iyo meelaha korontada, noocan shoolada badbaada ayaa loo baahan yahay.

www.sikkerhverdag.no/en

## Waa maxay qiimaha shoolada badbaadadu?

Qiimaha shoolada badbaada ah waxa uu ka bilaabmaa ilaa 3,500 NOK, iyadodo ku xidhan waxay qaban karto. Nooca ugu fudud waa ka ugu jaba, «Doorashada Rolls Royce» waxa uu qiimahiisu yahay saddex goor mid ka badan.

Labbada noocba waa la ansixiyay, laakiin iyaddoon loo eegin nooca, masuuliyiintu waxay ku talainyaan iibsashada shoolada badbaadada ah ee FG-ansixisay, waxaa loola jeedaa FG-Skadeteknikk, iyo midka maray baadhitaanka heerka caadiga ah. Waxaad ka heli karta shooladaha badbaadada ah ee ay FG-ansaxisay halkan: https://www.fgsikring.no/brann/komfyrvakt/fg/

Lacag dhimista caymiska: Qaar ka mid ah shirkadaha caymiska waxay ku siin doonaan lacag dhimista badbaadada ah ee caymiskaaga qadarkiisa lacageed haddii aad ku rakibtay shooladaha badbaadada ee FG-ansixisay. Fadlan ka hubso shirkadaada caymiska, haddii ay kugu habboontahay.

## Halkeen ka helaa shoolada badbaadada ah?

Waxaa laga iibsan karaa dhmmaan dukaanada korontada, dukaanada kijooyinka oo kala duwan iyo dukaanada onlaynka ah, tusaale ahaan, websaydka shirkadaha shoolada iyo shirkadaha caymiska. Haddii aad hesho adeegyada caafimaadka ee ka yimid degmadda, waxaad hubin kartaa haddii aad ka amaahan karto shoolada badbaadada ah kalkaas.

## Bal kawaran shuruucda?

Masuuliyiinta waxay qabaan shuruudaha soo socda ee shoolada badbaadada ah.

- Gudaha dhamman guryaha cusub
- marka la beddelayo rakibaada korontada ee guriga
- marka aad dib u cusboonaysiiyo kijadaada oo u baahan tahay shabakad koronto oo cusub.

Sharciyo la mid ah ayaa lagu dabaqaa guryaha fasaxyada. Shuruudaha shoolada badbaadada ah waxaa lagu dabaqaa guryaha iyo hoolalka la wada seexdo/dabaqyada, waxa loola jeedaa halka dadka seexdaan ama ku meel gaadh ugu noolaada. Shuruudahu kuma haboona kijooyinka yaryar iyo kijooyinka ku yaala goobta shaqada/dhismayaasha xafiiska.